2015

# QAAB-QORAALKA XUKUMADA IYO SOO BANDHIGISTA ARAGTIDA GARSOORAHA




**Garyaqaan Maxamed Axmed Cabdi Bacaluul**

**12/14/2015**

# Contents


QAAB-QORAALKA XUKUMADA GARSOORKA, IYO SIYAABAHA AY TAHAY IN UU GARSOORKU USOO BANDHIGO ARAGTIDIISA (Judicial Opinion).

1. Hordhac.......... 3

2. Xussida dulucda dacwadda (statement of issue).......... 4

3. Lafagurka iyo isku-jaangoynta sharciga iyo xaqiiqada (Applying the Rule to the Facts);....... 6

4. Sababaynta go'aanka iyo miisaamidda Caddaymaha.......... 9

5. Gaba-gabada (Court Holding);.......... 10

Lifaaq (annexes).......... 12

Endnotes .......... 15

## QAAB-QORAALKA XUKUMADA GARSOORKA, IYO SIYAABAHA AY TAHAY IN UU GARSOORKU USOO BANDHIGO ARAGTIDIISA (Judicial Opinion).

### 1. Hordhaca Xukunka;

Ujeedada loo samaynayo warbixinta hordhaca ahi waa inay Maxkamaddu kusoo dhawayso akhristaha, waxay ku saabsansantahay dacwaddan, ay ka garnaqday, ka hor intaanay gudo-galin sababaynta go'aankeeda. Warbixintani waa mid, u qoran si kooban, oon faah-faahin iyo sharraxaado dheeraad ahi, aanay la socon. Waana in uu hordhaca xukunka laga helaa qodobadan;

a) **Dhinacyada dacwada**; waa in si dhammaystiran loo caddeeyaa shaqsiyadda dhinacyada, haddii aan lagu xusin hordhacana, waa in lagu xusaa qaybaha hore ee aragtida Garsooraha, iyada la sheegayo magacyadooda, tiradooda iwm. Tilmaamaha lagu xuso ee lagu garanayo dhinac kasta, waa in si joogta ah loogu adeegsadaa gabi ahaanba qoraalka, oo aan la bad-badalin. Adeegsiga tilmaamaha sharci, sida "rafcaanleh" iyo "rafcaansane" kuwaasi oo aan, lagu jahwareero , gaar ahaan markay dhincyada dacwaddu badanyihiin.

a) **Awoodda ka garnaqiseed iyo habraaca-sharci ee la xidhiidha**; Waa inay maxkamaddu sheegtaa, inay awood sharciyeed u lahayd ka garnaqista dacwadda (**basis for** j**urisdiction**) ka hor intaanay guda galin ka warbixinta habdhagaysiga iyo doodaha dhinacyada, sidoo kalana waa inay si hordhaca ugu warrantaa sifaha ay dacwadani ku timid Maxkamadda.

b) **arrinta ama arrimaha laga garnaqayo**; Arrinta la isku hayo ee ay tahay inay Maxkamaddu ka go'aan gaadho, waa in iyadana la xaqiijiyaa waxay tahay, isla markaana si kooban loo qoraa. haddii aanay arrintaasi ama arrimahaasi aanay ahayn kuwa murugsan ama adag oo u baahan sharraxaad iyo faah-faahin dheeraada. Marka ay arrinta dooddu ka taagantahay ee ay dhinacyadu isku hayaan aanay ahayn kuwa fudud, waxa lagaga hadli karaa qayb-gaara.

Hordhac kooban oo laga bixiyo dulucda dacwaddu, wuxuu waqtiga u madhxinayaa akhristayaasha. Mararka qaar ayay Maxkamaddu si kooban uga warbixisaa go'aan ka ay gaadhay, iyadoo xagga dambe ku faafinaysa asbaabta, halka ay Garsoorayaasha qaarna, ay jeclaystaan, inay go'aankooda xagga dambe ku sheegaan.

## 1. *Xussida dulucda dacwadda (statement of issue).*

Xusidda ama ka warbixinta waxay ay tahay, dulucda dacwaddu , waxay u sahlaysaa akhristaha in uu fahmo aragtida Garooraha. Hadaba sida loo xaddidayo arrinta, ay dooddu ka taagantahay ee la isku hayo, waxa ay ku imanaysaa iyada oo la iswaydiinayo waxay tahay xaqiiqada dhabta ama dhacdada ugu muhiimsan ee la isku diidanyahay, iyo wuxuu yahay, mabadi'da sharciyeed ee lagu maaraynayaa ama loo marayo ka garnaqisteeda (**Substantive Law**)[1].

Waxa Dulucda Dacwadda ama arrinta ay dhinacyadu isku diidanyihiin xaqiiqadeeda, loo soo dhigaa qaab su'aaleed, marka la qorayo Xukunka Dacwadda. Tusaale ahaan;

1. ***Waxay Maxkamaddu ka garnaqaysa bal inay jiro heshiis wakaaladeed oo dhexmaray Mr X. (dacwoodaha) iyo Mr Y (dacweysanaha) ?***

Ama

1. ***Waxay Maxkamaddu bal eegaysaa in uu jiro faldambiyeed budh-cadnimo ah iyo inkale? Haddii uu faldambiyeedkaasi dhacayna, in uu Eedaysan Mr D, uu yahay kii geystay iyo in kale?***

Garsoorayaashu uma afduubna soo-jeedimaha ama lafa-gurista ay soo jeediyaan Qareenada kala matala dhinacyada, dacwad-oogayaasha ama bilayska, balse waxay sugaan nuxurka dacwadda sida ay iyagu u arkaan, marka ay ka baaraandagaan ee ay wax uga baxaan xaqiiqooyinka/dhacdooyinka iyo xaaladaha ku xeeran qoraal-dacwadeedyada (**Pleadings),** ay dhinacyadu usoo gudbiyeen. Waxaana haboon, in haddii ay jiraan Wakiilo sharciyeed, ay garsooraha ka caawiyaan sida, ay tahay xaqiiqada la isku diidanyahay, ee u baahan in go'aan garsoor laga soo saaro.

Marka ay Maxkamaddu qaaddo, tallaabooyinka, ay ku xaddido mawduuca dacwaddu, waa marxaladda ka horraysa Fadhiga Koowaad ee Dhagaysiga Dacwadda. Marxalladani, waa wakhtiga ugu horreeya, ee ay Maxkamaddu yeedhmadeeda ku qaraariso inay dhinacyadu horyimaadaan. Marka uu Mawduucu yahay Madani, Marxalada ka horraysa Dhagaysigu, waa Marxaladda, is-horkeenidda dhinacyada iyo ka go'aan-gaadhista ansaxnimadda waxa la isu-sheeganayo iyo inkale. Waxaana afka qalaad lagu yidhaahdaa (**Preliminary Examination of Parties and the Settlement of issues**).

Qodobka 132aad, ee Xeerka Habka Madaniga, ayaa sheegaya marka uu galku heerkani marayo, ee ay Maxkamaddu ka go'aangaadhayso inay cabashada horteeda taallaa tahay, mid sharci ahaan iyo xaqiiqo ahaanba laga garnaqi karo iyo inkale. Haddii ay tahay wax laga garnaqi karana, waxa uu yahay mawduuceedu, si ay, dhinacyada ugu hagto, waxyaabaha looga baahanyahay, ee dib-u-isixid qoraal ah, ama caddaymo ah[2].

Ka warbixinta dulucda dacwaddu, waa in uu noqdaa mid kooban. In kastoo arrinta ay dhinacyadu isku diidanyihiin, loo kala jajabin karo mid iyo laba, hadana waxa jiri kara dacwad murugsan oo koobsan karta arrimo badan oo dhawra oo is huwan. Xaaladaasi dambana, waxay keensan kartaa in la kala guro arrimahaasi oo lagu kale sheego duluco kala madaxbannaan (**Separate issues in one case**).

Hadaba ka warbixinta duluc-dacwadeedka, ama su'aasha taagan ee laga garnaqayo waxay ka hordhici kartaa ama ka dab-dhici kartaa, ka warbixinta dhacda-xaqiiqeedka (**statement of facts**). In si gaar ah loo sheego arrintay dooddu ka taagantahay ee laga garnaqayo, akhristaha macno-weyn ayay u samaynaysaa, waxaanay ku hagaysaa in uu hoos ugu sii dhaadhaco dacwadda, siina odoroso, heearka ay dacwaddu mari doonto, waxyaabaha la gudboon dhinacyada iyo xaqiiqooyinka u baahnaan doona in la caddeeyo.

Waxa se iman Kara, xaalado ka duwan sidaasi aynu hore ku sheegnay. Waxa jiri kara dacwado ay adagtahay in la sheego uun waxa laga garnaqayo, iyadoon marka hore akhristaha looga warramin ama wax fikrad ah laga siin xaqiiqada dacwadda. Tusaale ahaan waxay tani iman kartaa marka uu waxa laga garnaqo ee la isku diidanyahay uu yahay, hannaanka dacwad-qaadista **(procedural**), sidaa darteedna lama fahmi karo, iyadoon la sheegin sidii, ay markeedii hore ku timid dooddu (**setting)**.

## *2. ka warbixinta xaqiiqada (dhacdada) dacwadda (statement of fact).*

Dacwadda ay dooddeedu iskugu biyo shubanayso hal nuxur-dacwadeed, xaqiiqadeeda waxa meel hore lagaga sheegi karaa aragtida Garsooraha. Balse marka ay soo baxaan ama lasoo gudbiyo arrimo dhawr ah oo taxan, dhacdo-xaqiiqeedyadu waxa noqon karaan kuwo midiba ay mid kale ku xidhantahay . Dhacdooyin ama xaqiiqooyinka qaarna, waxay noqon karaan kuwa, usii kala dhaw-dhaw dulucda dacwadda. Xaaladdani waxay ku kallifaysaa garsooraha in uu kala haadiyo xaqiiqooyinka hor daadsan, ugana baaraan-dago sidii xaqiiqooyin ku filan uu , ugu bilaabi lahaa soo gudbinta warbixintiisa, si ay aragtidiisu u noqoto mid si fudud loo fahmi karo.

Warbixintan hordhaca ahi, waxay hadhaw ka furataa, in uu kusoo cel-celiyo sharraxaaddo dheeri ah, marka uu ka hadlayo qeybo hoos yimaadda dulucda dacwadda, oo si gaar ah, ugu sii baahan in loo sii fahmo. Xaaladahan oo kale, xaqiiqooyinka bar-bilawga ah, waxa lagu xaddidi karaa Hordhaca Xukunka, iyadoo dhacdooyinka ama xaqiiqooyinka ay tahay in si gaar ah looga

go'aanka gaadhana, lala hadhi doono, si hadhawto loogu ladho lafa-gurka dulucda ama nuxur-doodeedka ay xambaarsanyihiin.

Xaqiiqada lagama maarmaanka[3] ah, ee iftiiminaysa go'aanka Maxkamadda, oo qudhaata ayaa lasoo qaadanayaa, inkastoo siday xaqiiqooyinku ugu kala mihiimsanyihiin go'aanka, ay noqon karto arrin ay akhristayaashu ku kala duwanaan karaan. Qaraar maxkamadeedka lagu soo af-meeray asbaabta xukunkuna, iyo qodobada lagu saleeyayna ma noqonayaan wax si mug leh u tilmaamaya, daah-furnaanta hanaanka ka garnaqiseed, ee la xidhiidha dacwadda, haddii aan la sheegin jidkii loo soo maray, iyo asbaabihii lagu keenay qaraarka xukun. Xaqiiqooyinka Guud (**Background facts**) ee dacwaddu, waxay noqon karaan kuwo waxka tari karaa soo-koobidda nuxurka go'aan ee Maxkamadda iyo sharixidda asbaabta iyo macquulnimadda uu ku dhisanyahay qaraarkeedu.

Faah-faahinta, ka bad-badiska ah[4], ee xaqiiqooyinka lagu naax-naaxiyaa, waxay sababtaa marin-habaabin. Tusaale ahaan, taariikhda dhacadadu **(dates**), waxay abuurtaa jaah-wareerin, sidaa darteedna, waa in aan lagu cel-celin qoraalka, haddii aanay lagama maarmaan u ahayn go'aanka, ama aanu akhristaha fahamsiinayn asbaabtii go'aanka. Si kale haddii loo sheegana, in loo diyaariyo qoraalka hab-weedheed fudud, oo koob-koobani (**brevity and simplicity**), waa qaab la doorbido. Waxa kale oo ay tahay, in uu Garsooruhu siiyo mudnaanta, dhammaystirnaan iyo dhex-dhexaadnimada afka uu ku qoranyahay Xukunku.

Garsoorayaasha qaar ayaa, adeegsada xaqiiqooyin, aan saamayn ku lahayn ama muhiim u ahayn go'aanka, kuwaasi oo midabeeya, ama buun-buuniya qoraalkooda. Sida Garsoore qoraalkiisa ku dara weedh sidan u taalla "***Arrintaasi aad ayay nooga yaabisay*"**, halka laga yaabo, inay Garsoorayaasha qaarna, ay iska baadh-baadhaan farshaxannimo qoraaleed, si ay usoo jiitaan akhristayaasha. Hadaba faallooyinkaasi dheeraadka ah, ama xaqiiqooyinkaasi dul-socodka ahi, waa kuwo halis ah, oo abuuri kara, faham qaldan, sida akhristaha, oo isku qanciya, inay waxyaabahaasi yihiin qaar ka mida asbaabta laga soo dhiraan-dhiriyay xukunka Maxkamadda.

### 3. *Lafagurka iyo isku-jaangoynta sharciga iyo xaqiiqada (Applying the Rule to the Facts);*

Xeerka iyo qodobka sharci waa halbeegga ama qalabka lagu tijaabinayo bal inay jirto arrinta doodu ka taagantahay ee ay dhinacyadu isku hayaan iyo in kale[5]. Waa inay Maxkamaddu qodobka ka hadlisaa, isla markaana u kala jajabisaa tiirarka uu ka koobanyahay si ay u lafa-gurto marka ay ku gudo-jirta sababaynta Mawqifkeeda. Waana inay Maxkamaddu si fiican u qeexdaa bal inay Qodobka sharci iyo isleeyihiin xaqiiqada dacwadda ee ay dooddu ka taagantahay. Si aad taas u samaysana, waxa Maxkamadda looga baahanyahay inay ka hadasho

mabda'a guud ee Qodobku ku dhisanyahay, balse aanay durba kuu boodin gaba-gabada. Tusaale ahaan;

> *" Wakaaladdu waa xidhiidh sharci oo ka dhasha marka uu jiro heshiis u dhexeeya wakiisha iyo muwakalka, kaasi oo dhigaya in uu Muwakilku guto waajibaadka u igmado wakiishuhu, una guto si ay faaido u leh wakiishaha, Sidoo kalana muwakilku wuxuu xaq ugu yeelan doonaa wakiishaha abaalmarin-dhaqaale ama khidmad uu ku fuliyo hawlahaasi, haddii aanay wakaaladdu ahayn mid bilaash ah……"*

Waa sidaasi lafa-gurka sharci, marka arrinta la isku hayaa ay tahay oo kale wakaalad. Waxaad soo qaadanaysa **Qodobka 607**aad ee Xeerka Madaniga ah. Oo dhigaya in uu meesha jiro;

- Heshiis u dhexeeya wakiishaha iyo la wakiishaha
- Heshiiskaasi oo uu la wakiishuhu ku ballanqaadayo inuu u qabto wakiishaha hawl
- Hawshaasi oo ah mid xalaal ah oo sharcigu ogolyahay.

Kala jajabinta Qodobku, waxay Garsooraha u sahlaysaa in uu ka go'aan gaadho bal inay jirto wakaaladan dhinacyada isku hayaan, ee midna ku andacoonayo, kan kalana diidanyahay leeyahayna, fuduushiisa ayuu ka galay ee umaan u igman hawlahaasi. Markaa wuxuu dib ugu noqonayaa, dhacdadii ama xaqiiqadii dacwadda. Wuxuu soo qaadanayaa, xaqiiqada inta ay isla ogolyihiin ee dhacdada ku jirta, iyo inta loo helay maragyo/marag-muujin sheegaysa jiritaankeeda, kadibna wuxuu iswaydiinayaa inay xaqiiqooyinkaasi ay buuxiyaan saddexdaasi shuruudood ee Qodobku dhigayo. Amma inay Xaqiiqo kastaa ay tiirkeeda qabsanayo iyo in kale? Haddii ay iswaafaqaan, waxa uu sharraxayaa sida uu Garsooruhu uu isku aqbalsiiyay Xaqiiqooyinka iyo tiirarkii Qodobka ( Qodobkii halbeegga u ahaa ka qarnaqista xaqiiqada 607 XM). Xaqiiqooyinkaasi oo uu sheegayo sida uu ugu qanacsanyahay jiritaankooda[6].

Hadaba, Marka uu Garsooruhu uu ku gudo jiro Sharraxaadan uu kaga waramayo habka uu isku bar-bardhigay Xaqiiqada iyo Xeerka (Qodobka) ayaynu leenahay, Garsooruhu wuxuu **sababeeyay Go'aankiisa**. Sharraxaadaasina, waa Qaybta ugu muhiimsan ee la rabo in uu ka koobnaado 70% qoraalka Xukunku.

Inta uu Garsooruhu ku gudo jiro Sharraxaaddaasi, maaha in uu ku boodo gaba-gabada oo tusaale ahaan Yidhaahdo ***" Dacwooduhu wuxuu wakiil u ahaa dacweysanaha".*** Balse waa in uu si xeel-dheer oo hufan u qeexaa mabaadi'da Sharciyeed ee bud-dhigga u ah Qodobka Sharci

ee lagu garnaqay , isagoo ku dadaalaya in aanu sharraxaadiisa soo dhexgalin magacyada dhinacyada. Haddii aan tusaale labaad ka bixinno dacwad ciqaab ah, oo faldambiyeedkeedu yahay dil, garsooruha waxa laga rabaa in uu, u dhigo sidan oo kale;

***" Si aynu u xaqiijinno in uu dhacay fal-dambiyeed dil ahi, waxa xeer-ilaalinta laga rabaa inay caddeeyaan arrimaha;***

***a) xaqiiqda ah inay dhimasho jirto.***
***b) Dhimashadaasi ay tahay mid ku timid sabab sharci-darro ah.***
***c) Dhimashadaasina loo geystay si badheedh ah oo ay ka muuqato cadaawadi (caused with malice aftersought)"………***
***d) Haddii sidaasi loo geystayna, uu eedaysanuhu yahay kii geystay.***

Haddii aynu tusaale kale usoo qaadanno, dacwadda Dastuuriga ah, ee a axsaabtu kaga cabanayeen Maxkamadda, waxa laga rabay inay Maxkamadda lafa-gurtaa qodobka Dastuur ee la xidhiidha, Dacwaddii ay Axsaabta ee liddiga ku ahaa Go'aankii ay Wasaaradda Arrimaha Guduhu ku maanacaysay inay Axsaabtu shirar qabtaan. Kasoo qaad inay soo qabsatay Qodobka 32 (2) ee **Distoorka JSL**, waxay Maxkamaddu qeexi lahayd mabaadi'da sharci ee nuxurka u ah qodobka, oo noqon lahaa sidan;

***" Abaabulidda ama ka qayb-qaadashada kulan nabadeed oo sharciga waafaqsani, waa xaq dastuuri ah oo muwaadinkastaa leeyahay"***

**Sida Qudha ee Xaqaasi, lagu hor-istaagi karaana, waa inay cidda hor-istaagaysaa, ay caddayso in uu;**

- ***kulanku yahay mid nabad-gelyada khatar galinaya, sidoo kalana,***
- ***aan waafaqsanay sharciga ah ( i.e. tusaale ahaan jabinayaa xeerkaasi iyo qodobada noocaasi ah)……..***

Marka laleeyahay Qodob sharciyeed ha ku saleeyo Garsooruhu, maaha macnaheedu, ha isdaba galiyo Qodobo badan, oo iskugu jira, qodobo guud iyo qodobo aanu nuxurkoodu xidhiidh la lahayn dulucda dacwaddii uu ka garnaqayay. Qodobka lagu garnaqay (**Substantive Provision**) ee halbeegga u ah dacwadda ayaa la rabaa in Garsooruhu u cuskado xukunkiisa. Tusaale ahaan, markaynu ka garnaqayno bal inay arrinta la isku hayaa, *ay Dayn tahay iyo inkale*, *in uu jiro heshiis sharciye iyo in kale*, *in la gaystay faldambiyeed budhcadnimo iyo inkale*, waxaan shaki ku

jirin inaynu adeegsanayno Qodobada asaasiga ah, ee mawduucaasi la xidhiidha ( **Substantive Provisions**). Balse maaha inay Maxkamaddu go'aankeeda ku taxdo qodobada habraaca ah, ee lawada yaqaano, inay dacwadahoo dhan maraan, sida Qodobada sheegaya dhegaysiga maragyada iyo qabashada cadaymaha, ama qodobada sheegaya awoodda garsooraha ee go'aan-gaadhista amaba qaabka xukunka.

Waxa jiri kara, xaalado gaar ah oo uu, garsooruhu u cuskan karo Qodabada Habraaca ah, Xukunkiisa. Waana Marka waxa la isku mari laayahay, ay la xidhiidho habka loo qaadayo dacwadda, ee aanu la xidhiidhin xaqiiqada dacwadda **(the merits of case**). Haddii aan si kale u sheegana, waa marka, ay dhinacyadu isku qabtaan, habka dacwaddan loo dhagaysanayo, amaba la isku qabto, in la furan karo amma, aan la furan Karin, amaba la isku qabto awoodda Garsoor ee ka garnaqisteeda leh.

### *4. Sababaynta go'aanka iyo miisaamidda Caddaymaha.*

Qeybtani Maxkamaddu waxay ku darsaysaa, sida ay Caddaymuhu ula jaanqadayaan Xaqiiqadda/dhacdada ay dooddu ka taagantahay. Waxaynu ognahay in uu waajibka caddayntu uu mar walba raaco dhinaca dacwadda bilaaba (Xeer-ilaalinta, dacwoodaha), haddii aanu dhinac kale qiraal bixin. Iyadoo laga duulayo Qodobka sharci, ee qeexaya inay arrinta, ay dooddu ka taagantahay jirto iyo in kale, waxay Maxkamadu eegaysaa, bal inay, Caddaymaha lasoo gudbiyay si shaki la'aan u buuxinayaan shuruudihii qeexayay jiritaanka arrintaasi, ee ay dhinacyadu isku hayaan.

Sida inta badan dhacda, ee lagu arko xukunnada kasoo baxa Maxkamadaha, sababaynta xukunku maaha, in dib loo soo celiyo wixii ay Maragyadu fureen ee kuwada qornaa garmaqalkii dhagaysiyada, tusaale ahaan inay tidhaahdo Maxkamadu;

***"Markay maxkamadu aragtay maragfurka xeer ilaalinta ee X. ee furay sidan….***
***Markay aragtay doodda qareenka difaaca ee u dhignaa sidan…..***
***Markay dhagaysatay maragyada Xeer Ilaalint eek ala ah …..***
***Markay sidoo kale dhegaysatay Maragyada…….***
***waxay go'aamisay sidan……"***

Sababayntu waa Qeybta ay Maxkamadeedu ku soo gudbinayso wixii uga baxay dacwadda. Sidaa darteed lagama rabo inay inoo sheegto inay wax aragtay, ama dhagaysatay oo ay inagu dhaafto "*Markay Maxkamaddu aragtay…. Markay Maxkamaddu dhagaysatay…"* dabadeedna go'aan aan meelnaba haysan oo ay iyadu aragtay ama garatay uun ay ku dhawaaqdo. Mana aha inay Maxkamadu dadka u sheegto inay caddaymo la horkeenay ay dhagaysatay, oo waynu ognahay

waxay dhagaysatay, garmaqalkana wuu inoogu jiraa, balse waxaynu ka rabnaa, inay, inoo sheegto, hadday dhegaysatay maxaa uga baxay, ee ay ka dhex-fahantay ?

Waxa la yidhaahdaa maaha, Garsoorku in uu Dadka, u sheego inuu Caaalad Sameeyay, balse waa in la arko cadaaladdu sameeyay waxay tahay **“ Justice is not only done, but is to be seen done ”**. Tanina waa sababta, Dhagaysigu uu, u noqday mid furan oo aan ku koobnayn dhinacyada is-haya iyo Garsooraha u garnaqaya oo qudha. Sida kaliya, ee Maxkamaddu dadka u tusi kartaa dhex-dhexaadnimadeeda iyo aqoonteeda sharciyeedna, waa iyadoo la timaata dood sababaysan oo ay ku difaacayso Mawqifkeeda.

***Maxay sababayntu u tartaa Xukunka ?***

Siday hore u soo sheegnay Sababayntu waa Sharraxaadda uu Garoosuhu sameeyo marka uu isbar-bardhigayo, Xaqiiqada iyo Xeerka. Isbar-bardhigaasi oo la mid ah, Marxaladda Shaybaadhka ee dhiigga bukaanka la mariyo ka hor intaan la go’aamin cudurka uu qabo iyo xumadda haysaa waxay tahay. Halkanna, waxay Maxkamaddu sharraxaad ka bixinaysaa, qiimaha ay lahaayeen caddaymihii kale duwanaa ee lasoo hordhigay. Waxay sababayntaasi, ku miisaamaysaa, culayska ay caddaymahaasi leeyihiin iyo sida ay u xaqiijiyeen amaba aanay u xaqiijin wixii la isku hayay. Waxaanay sheegaysaa caddaymaha ama maragyada ay Maxkamadu, u, aqoonsatay inay ka dhab-sheegayaan xaqiiqada la isku-hayo iyo sababta ugu aqoonsatay. Halka ay sidoo kale sheegayso, caddaymaha ay u aqoonsatay in aanay ku fillayn iftiiminta Xaqiiqada la isku hayo iyo kuwa baalmarsan iyo meelaha ay ka gaabiyeen inay muujiyaan. Intaasi waxa dheer, oo laga rabaa inay Maxkamaddu, sababaynteeda ku xusto, caddaymaha been-abuurka ah, iyo kuwa isburinaya, een lagu kalsoonaan karin.

Habkan ay Maxkamadu ku sababaynayso, waa mid ku xidhan Suuraynta siyaabaha caqligalnimada ah (**Reasoning and logic**) ee caddaymaha loogu xidhiidhin karo dhacdooyinka ay khuseeyaan. Caddaymahaasi oo marka loo eego, xaaladaha guud ee ku gadaaman mawduuca dacwadda, ama si macquula isku xidho dhacdooyinka, laga dhex fahmi karo, xaqiiqada dhabta ee qeexaysa jiritaanka dulucda dacwadda.

### *5. Gaba-gabada (Court Holding)[7];*

Waxaad isku soo dheririsay ood isku soo beegtay, Qodobka sharci iyo caddaymihii dhinacyada. Waxaa kusoo baxay caddaymo badan oo waafaqsan xaqiiqadii ay furayeen, iyo kuwa kale oon xidhiidh la lahayn, kuwa uu halbeegii sharci diiday oon lagu dhaqmi karin. Waxa laga yaabaa inay kuu soo baxeen sidoo kale, caddaymo tilmaamaya xaqiiqooyin aan jirin, kuwa is-burinaya, ama mala’awaal ah. Waxa kuu soo baxaya, arrimo badan intii aad ku gudo jrtay lafa-gurka dacwadda. Arrimo badan ayaana kaagaa soo dhex-baxay hirdankii dhexmaray dhinacyada.

Waxaad soo gaadhay, markii adiga lagu waydiin lahaa, siday kula tahay. Waxa lagaaga fadhiyaana waa jawaab; lagu kala calaf qaado. Jawaabta ugu macquulsan, ee qof caddaymahaasi haysta, oo ka duulayaa awooddaada sharci uu si dhex-dhexaada u keeni lahaa. Jawaabtii lagu soo afjari lahaa, su'aashii uu ka bilaabmay dagaalku iyo doodihii sharci ee dhinacyada dhexmaray . Su'aashaasi oo qaabkeedu ahaa, miyay jirtaa sidaasi mise ma jirto. Tusaale ahaan;

- ***Miyuu dacwooduhu wakiil sharci u ahaa dacweysanaha mise umuu ahayn ?***
- ***Miyuu dhacay faldambiyeed dil ahi mise ma dhicin? Mana yahay eedaysanuhu kii geystay mise maaha? Iwm.***

Geba-gabada ama go'aanka (Holding), wuxuu dulucdaasi sare uga jawaabayaa sidan oo kale;

***…………Sababtaasi awgeed waxay Maxkamaddu go'aaminaysaa in uu Mr X ahaa wakiil sharci oo lahaa dhammaan awoodihii wakaaladeed markii uu…...***

Amma

…… ***Sidaasi awgeed waxay Maxkamaddu go'aamisay in aanu Mr X ahayn Wakiil sharciya oo uu ku xad-gudbay Mr Y, iskiina isku siiyay awoodo, aan lagula heshiin, markii uu…. iwm***

Isla Go'aanka, wuxuu garsooruhu, ku sheegayaa dhinacay gartu raacday, isagoo xagga hore kusoo caddeeyay sababaha kusoo hogaamiyay go'aankaai. Wuxuuna sidoo kale go'aaankiisa, ku kala xaqsiiyaa dhinacyada **(relief),** isagoo ku qeexaya, waxa la kala helay hadday madani tahay, hadday ciqaab tahayna, eedaysanaha ku hela ama ku waaya faldambiyeedkii loo haystay **(acquital or conviction).**

---

## About the author:



**Mohamed Ahmed Abdi Ba'alul (LLB).**

**Interested in the field of Legal Analyses and Researching.**

**University of Hargeisa, Faculty of Law and Legal Aid Clinic.**

***e-mail; waddi12@gmail.com or 252 63 44 88 011.***

**Lifaaq (annexes);**

Date: 22/07/2015
Hageysa

Ku:Maxkamadda Sare ee Jamhuuriyadda Somaliland.

**Ujeedddo: Daacwad hordhac ah oo Idaari ah.**

Labada Xisbi qaaran ee UCID iyo Waddni waxay Maxkamadda Sare ee sharafta leh halkan ugu soo gudbinayaan cabasho aannu ka qabno amarro ka soo baxay Wasiir-ku-xigeenka Amniga, taliyaha Ciidanka Booliiska, iyo badhasaabka Gobolka Maroodi-jeex saddexdaba, kuwaas oo ka baahiyeen qalabka warbaahint. Nuxurka ammarradaas kala geddisan waxay ku soo ururayaan:

a) Inaan Xilllllijllifl qaranku isugu iman Karin shir ay ku ballameen inay kaga wada hadalaan arrimaha ku saalbsari1dO •hoo•yinlka oo mu<ddadooi dii muran ka taagan yahay.
b) Inay amar ku soo rogeen hudheelacla magaaladaa inaan Xisbiyadu shirar ku qabsan Karin.

wa.xannu qabnaa in amanadaasi in amarradaasi ay liddii ku yihiin sharciyadda xisbiyada qaranka. xuquuqda asaasiga ah ee muwaaddinka, iyo distoorka dalka intaba-

Sidaa darteed.wa.xannu Maxkamadda Sare ee Sharafta leh ka eodsanaynaa inay hakiSO ammaarradaas lidka ku ah xeetta xisbiyada, xuquuqda distooriga ah ee rnu".lddinka iyo xoniyaadkii ganacsiga intaba.

REPULIC OF SOMALILAND

Maxkamadda Dastuurka

Constitutional Court

MS/DD/ 01 /2015

المحكمة العليا

Date:23/07/2015

Maxkada Dastuuriga oo ka koobab:

1- Adam Xaaji Cali Axmed — Gudoomiye
2- Cabdiqadir Axmed Maxamuud — Xubin
3- Maxamed Cumar Geele — Xubin
4- Cabdiraxmaan Madar Caraale — Xubin
5- Yaasiin Xasan Ismaaciil — Xubin

Maxkamada Dastuurka ee Jamhuuriyada Somaliland

**Markay Aragtay** Qodobka 98(1)(J) iyo 101aad ee Dastuurka Qaranka Jamhuuriyada Somaliland

**Markay Aragtay** Cabashada ay u soo qorteen labada Xisbi Mucaarid ee " Xisbiga Cadaalada iyo Daryeelka-UCID iyo Xisbiga WADANI" kuna Taarikhaysan 22/07/2015

**Markay Aragtay** Jawaab celinta ay soo Gudbiyeen Cidda laga cabanaayay oo ah Wasaarada Daakhiliga iyo Taliska Booliiska kuna Taarikhaysan 22/07/2015,

**Markay Aragtay** Kasloonida ay dhinacyadu siiyeen Maxkamada Dastuurka, Waxay Soosaartay Qaraarkan:-

QARAARKA MAXKAMADDA

1- In Axsaabta Mucaaradka ee UCID iyo WADDANI ay xaq u leeyihiin in ay [illegible] shirarka uu sinnaayo Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland, Xeerka Nidaamka [illegible] iyo Axsaabta siyaasada iyo Xeerarka kale Qaranka Somaliland, Qaar ahaan Qodobada 22aad, 23(3)aad, 32(1)(2) Dastuurka Qaranka. Waxa kale oo waajib ku ah Wasaarada Arimaha Gudaha, Booliska iyo Hay'addaha kale ee Qaranka in ay ixtiraamaan isla markaana aaanay ka horjoogsan Xuquuqda Dastuuriga ah ee ay leeyihiin Axsaabta Mucaaridka iyo Muwaadiniinta kale si waafaqsan Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland iyo Xeerarka kale ee Dalka u yaala.

2- Dhinaca kale wixii ka dambeeyay Aftidii Dastuurka ee 2001, sida uu dhigaayo Qodobada 9(1)aad iyo 130(1)aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland waxa laga soo guuray nidaamkii Beelaha waxaana loo soo guuray nidaamka ku salaysan Dastuurka iyo Axsaabta badan, waxaana jira Golayaal Qaran ( Xeer Dajinta, Fulin iyo Garsoor) oo dhaqan gal ah, kana jawaabaya baahida qaranka ee hadba taagan si waafaqsan Dastuurka. Waxa hadaba Xaaraan ah isla markaana aan sharci ahayn in cidnaba (haday tahay Qabiil, ururo siyaasadeed iyo cid kale toona) ku baaqdo "Shir Qaran" ama "Shir-aayo-ka-tashi-Qaran" oo aanay Golayaaasha Qaranka ee Dastuuriga ahi hogaaminayn si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka dalka u yaala.

3- Dhinaca kale Maxkamada Dastuuriga ahi iyada oo og in murankan taagani salka ku hayo qabashada doorashada soo socota, waxa ay amraysaa dhamaan dhinacyada siyaasada iyo Hay'addaha ay khusayso ee dastuuriga ah inay sida ugu dhakhsaha badan u soo afjaraan muranka ku saabsan Dooraashada soo socota isla markaan xal ka gaadhaan si loogu diyaargaroobo Doorasho Xor iyo Xalaal ah .

4- Maxkamada Dastuuriga ah waxa ay ku amraysaa dhinacyada Siyaasada in ay ilaaliyaan Xeerarka iyo Xeer Hoosaadada Dalka ee la xidhiidh Akhlaaqada wanaagsan (Good Ethics) Xiliga doorashada iyo xiliyada kaleba.

5- Qaraarkan Waxa lagu dhawaaqay Maanta oo ay Tarriikhdu tahay 23/07/2015.

| | | |
|---|---|---|
| 1- Adam Xaaji Cali Axmed | Gudoomiye. | |
| 2- Cabdiqadir Axmed Maxamuud | Xubin. | |
| 3- Maxamed Cumar Geele | Xubin. | |
| 4- Cabdiraxmaan Madar Caraale | Xubin. | |
| 5- Yaasiin Xasan Ismaaciil | Xubin. | |

Maxkamada Dasturriga JSL

## Endnotes;

---

1 Markaad eegto xukunka Maxkamadda Sare ee lagaga garnaqayay Cabashaddii ay Xisbiyaddu mucaaridku ay kaga cabanayeen; Goa'aankii Maamul ee Wasaaradda Arrimaha Guduhu ka hor-istaagayay inay qabtaan; Shir-Qaran. Maxkamaddu si ay taasi u go'aamiso, waa inay Qeexdo mabaadi'da sharci ee la xidhiidha dacwadda, taasi oo noqon lahayd,

- *Ma jiraa Qodob sharci oo Qeexay wuxuu yahay **Shir-qaran**?*
- *Haddiise uu Qeexay, waa maxay cidda awood u leh inay Qabato Shirkaasi Qaran?*

Balse Maxkamaddu waxay raacday dooddii Xukuumadda ee dhigaysay inay aanay Axsaabtu Qaban karin shir-qaran. Waxaanay Sidoo kale ka hor-istaagtay inay Axsaabtu, iyo cid kale toona qabato waxa lagu tilmaamay **SHIR QARAN**. Qodobadda Dastuuriga ah ee loo cuskaday Go'aankaasina kama hadlayaan waxay ku sheegtay Shir-qaran, manay sababayn sidoo kale, sababta ay u qodobadan ugu cuskatay, tusaale ahaan may bixin fassiraad sharci oo si dadban uga muuqata nuxurka qodobadaasi dastuuriga ah, kuwaasi oo sheegaya inay Golayaasha Dastuurig ah ( xukuumadda, Wakiilada, Guurtida ) ay yihiin kuwa qudha ee qaban kara, waxa lagu tilmaamay **SHIR-QARAN**.
Eeg faqradda labaad ee xukunka;

*2. Dhinaca kel wixii ka dambeeyay aftidii Dastuurka ee 2001, sida uu dhigayo Qodobada 9 (1)aad iyo 130(1) aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland waxa laga soo guuray nidaamkii Beelaha waxaana la soo guuray nidaamka ku salaysan Dastuurka iyo Axsaabta badan, waxaana jira Golayaal Qaran ( Xeer Dajinta, Fulin iyo Garsoor) oo dhaqan gal ah kana jawaabay baahida Qaranka ee hadba taagan si waafaqsan Dastuurka. Waxa hadaba Xaaraan ah isla markaana aan sharci ahayn in cidnaba ( haday tahay Qabiil, ururo Siyaasadeed iyo cid kale toona) ku baaqdo "shir Qaran" ama " Shir-aayo-ka-tash-Qaran" oo aanay Golayaasha Qaranka ee Dastuuriga ahi hogaaminayn si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka Dalka u yaala.*

*Eeg lifaaqa 3aad.*

2 Qodobka 132 Xeerka Habka Madanigu oo cinwaankiisu yahay ***Xaqiijinta Ansaxnimada Dacwadda*** wuxuu u dhiganyahay sidan "*Garsooruhu wuxuu iskiisa u xaqiiqsanayaa, hagaagsanaanta dhismaha dacwadda, haddii loo baahdana wuxuu ka codsanayaa dhinacyadu inay hagaajiyaan, dhammaystiraana, dokumnetiyada ay sugidda u qaddimeen*".

3 Qodobka 121 (c) Xeerka Habka Ciqaabta ayaa sheegaya in uu Garsooraha Dacwadda dhagaysanayaa uu Xukunkiisa ku sheego Xaqiiqada/dhacdada iyo xaaladaha ay ku dhisantahay ama ka koobsanayso dulucda eeddu (Statement of the facts and circumstances which form the subject of the charge).

Qodobka 91(4) ee Xeerka Habka Madaniga ayuu kusoo ururinaysaa waxyaabaha ay dhinacyadu ka codsanayaan Maxkamadda. Ama waxyaabaha ay doodda dhinacyadu ka koobantahay ee la xidhiidha dulucda laga garnaqayo.

4 Xaqiiqooyinka Dheeraadka een loo baahnayn si aad u fahamtid, u fiirso isla go'aankaasi faqraddiisa 3aad. Maxkamaddu, waxay u gudubtay tafaasiil dheeraad ah oo ka baxsan arrintii la isku hayay waxaanay faqradda Saddexaad ee go'aankeeda raacisay, tafaasiil kale oo dheeraad ah, oo ka baxsan dulucdii dacwadda ee ahayd; Xisbiyada Mucaaridku Xaq ma u leeyihiin inay Qabtaan Shir-qaran iyo inkale?

Waxaanay gashay mawduuc kale oo ay sheegtay inay Maxkamaddu ogtahay, balse aanay cid kale cabashadooda ugu sheegin. Waxaanay faqraddu u taalay sidan;

*3. Dhinace kale Maxkamada Dastuuriga ahi iyada oo og in murankan taagani salka ku hayo qabashada doorashada soo socota, waxa ay amraysaa dhamaan dhinacyada siyaasasda iyo Hay'adaha ay khusayso ee Dastuuriga ah inay sida ugu dhakhsaha badan usoo afjaraan muranka ku saabsan Doorashada soo socota isla markaana xal ka gaadhaan si loogu diyaargaroobo Doorasho Xor iyo Xalaal ah.*

*Eeg lifaaqa 3aad.*

5 Qodobka 121 (d) Xeerka Habka Ciqaabta ayaa ka hadlaya ka hadlayaa in Xukunka lagu Sheego Qodobada sharci iyo Xaqiiqada/dhacdooyinka la caddeeyay, ee sababay ay Maxkamaddu ku go'aanka qaadatay. Sidoo kalana eeg qodobka 92(5) Xeerka Habka Madaniga.

6 In uu garsooruhu yidhaado "***anaa ku qancay jiritaanka xaqiiqo la isku hayay***", ama "***Marka ay Maxkamadu ku qanacday xaqiiqada caynkaasa ayay go'aamisay sidan iyo sidaasi***" maaha wax akhristaha ama dhagaystaha go'aankaasi uu la qaadan karo, haddii aanu sheegin sababta uu ugu qancay inay Xaqiiqadaasi jirto, ee aanay u jiri karin. Sida Qudha ee u sheegi karo sababta uu ugu qancayna, waa

1. **<u>isagoo inoo sheega caddaymaha muujinaya jiritaanka xaqiiqadaasi (Credible and Direct Evidence),</u>** iyo inay caddaymahaasi saxyihiin oon la hayn wax lagaga shakiyi karo oo macquula.
2. Habka kale ee uu isna ku sababayn karaa waa isagoo Garsooruhu sheega, walaw aanu jiritaanka Xaqiiqadaasi u haynin, caddaymo toos ah, balse ay tahay mid uu jiritaankeeda **<u>uu ka dhex fahmay habdhaqanka, iyo duruufaha ku xeeran ee xidhiidhka la leh dhacdada, ama wada-macaamilka dhinacyada is-haya (Inferential evidence</u>**). Fahamkaasi oo qofkasta oo macquula oo dhex-dhexaad ahi, oo halkiisaasi taagani, qaadan lahaa,

7 **Holding** *is a statement of law that is court's answer to the issue. If you have written the issue statement correctly, the holding is often the positive or negative statement of the issue statement.*

*Eeg Xukumka Maxkamadda Sare ee lifaaqa ah; Sideey u gaadhay Maxkamaddu gaba-gabadeeda? Ma ku sheegtay in maalintaas laga bilaabo, ay laashay ama waxba kama jiraan ka dhigtay go'aankii maamul ee laga codsaday inay dib-u-eegis Garsoor ku samayso (**Judicial Review**) Sharcinnimadiisa? Mise waxay u sheegtay uun Axsaabta Xuquuqdii Dastuuriga ahayd ee ay lahaayeen? Sideebaanay Qodobada **22**aad iyo **23(1,2)** ee **Dastuurku** ay xidhiidh ula leeyihiin dulucdii dacwadda ee ku saabsanayd Go'aankii ay Wasaaraddu ku hor-istaagtay in Kulamo ay qabtaan Xisbiyada iyo Siyaasiyiintii la baxay Madashay? Ma ka helnay Go'aankan Mabda' sharciyeed oo Fasiraad ahaan loogu adeegsan karo xaaladaha la midka ah?*